HORIZON INSTITUTE



Taxanihii Labaad ee Fashil Wadareed

# XABSIYEYNTA CARRUURTA KA HOR INTA AYNA MAXKAMADDU GO'AAN KA GAADHIN IN AY YIHIIN DAMBIILEYAAL

OCTOBER 2020

# HORDHAC

Marka carruurta Somaliland lagu soo eedeeyo dambiyo waxa loola dhaqmaa sidii oo ay yihiin danbiileyaal. Boolisku way soo xidheen oo xabsiga u taxaabaan, mararka qaar usbuucyo iyo xataa bilo, ka hor inta aanu garsoore dhegaysan caddaymaha ka dhanka ah. Dadka waaweyn ee ku nool Somaliland ayay ku dhacdaa arrintan oo kale. Booliska iyo nidaamka caddaaladda ee adduunka oo dhan ayaa qaabkan u dhaqma. Balse habkani waa mid sharciga ku qaldan, haddii la fuliyana madhalays ah.

Marka qof, ha ahaado qof weyn ama ilmo yar lagu soo eedeeyo danbiga, boolisku waa in ay baadhaan, xeer-ilaalintuna waa in ay dacwadda soo oogaan kaliya haddii ay caddayn jirto. Garsooruhu waa inuu xukumaa kaliya haddii dambiga loo cadeeyo si aan shaki ku jirin, dadweynuhuna waa in ay sugaan illaa maxkamaddu go'aan ka gaadhayso in uu qofku yahay danbiile ka hor inta ayna u malayn in uu danbiile yahay qofku. Masuuliyaddani aad ayaa intaa uga sii weyn tahay marka qofka la soo eedeeyey yahay ilmo yar. Dhab ahaantii, si kasta oo ay ahaataba, go'aanka "in cashar la baro" ayaa meesha ka saaraya go'aanada kale ee laga fikiri lahaa, carruurtana waxa loola dhaqmaa sidii oo ay danbiile yihiin halkii looga tixgelin lahaa in ay beri yihiin.

Dhawrista xaqa in qofka loola dhaqmo in uu yahay bilaa danbi illaa maxkamad sharci ah ku caddaynayso, waxa ay muhiim u tahay dhawrista xuquuqda carruurta. Carruurtu waa kuwo aad u nugul. In la xidho ka hor iyo inta dacwaddoodu socoto waxa ay u bandhigaysa halis weyn oo ah in si xun loola dhaqmo, marka lagula xidho dadka waaweyn, sida ka dhacda Somaliland, isla markaa ay sii lugooyaan dadkaa waaweyni ee la xidhan ee danbiyada culus galay. Waxa kale oo ay ka dhigan tahay in lagu faquuqo in ay danbiileyaal yihiin oo facooduna ku dacaayadeeyo.

Sharciga Somaliland waxa uu qirayaa halisahaa jira. Waxa jira dhawris sharci oo cad oo si gaar ah loogu tallo galay in lagaga dhawro carruurta cawaaqibta halista ah. *Xabsiyeynta Carruurta Ka hor inta ayna Maxkamaddu Go'aan ka Gaadhin In ay Yihiin Dambiileyaal* waxa uu sharraxaad ka bixinayaa sida fudud ee carruurta loo xidho ka hor inta aan lagu helin danbiga. Warbixintu waxa sidoo kale ay lafaguraysaa xeerarkaas, haddii la fuliyo, waxay dhawri doonaan xuquuqdooda ah in loola dhaqmo in ay yihiin beri illaa danbiga lagu caddaynayo.

Warbixintani waa taxanihii labaad oo ka tirsan taxane shan qaybood ah, *Fashil-wadareed: Sida uu Hanaanka Cadaaladda Danbiyada ee Somaliland uu u Waxyeelleeyo Carruurta iyo Waxa aan Ka Wada Qaban Karno*. Taxanahani waxa uu isku dayayaa in uu bulshada la wadaago duruufaha soo waajaha carruurta ku eedaysan danbiyada iyo waxa aynu dhammaanteen ka wada qaban karno sidii aynu u abuuri lahayn nidaam caddaalad ku sallaysan. Waxa kale oo warbixintani ay lafaguraysaa afar

mawduuc oo kale marka lagu daro sida xadhiga dhegaysiga dacwadda ka horreeyaa uu u ciqaabo caruurta ka hor inta aan xukunka lagu ridin: maxay sharci darro u tahay in la ciqaabo carruurta 14 jir iyo ka yar ee ku xusan Taxanaha Koowaad; sida garsooreyaashu ugu ciqaabaan caruurta wakhtiyo dhaadheer oo xabsi marka loo eego dambiyada yar-yar ee ku xusan Taxanaha Saddexaad; sida nidaamka caddaalad ciqaabeedku uu meesha uga saaray masuuliyaddii qoyska, doorkii bulshada, isku duubnidii iyo barnaamijkii waxbarashada xukuumadda iyo adeeggii bulshada ee ku xusan Taxanaha Afraad; iyo tallaabooyinka ay hadda qaadi karaan dadka ka shaqeeya nidaamka caddaalad ciqaabeedku, iyaga oo aan eegaynin inta yare e dhaqaalaha haysata, si loo xaqiijiyo in ilmo kasta loola dhaqmo inuu yahay ilmo yar ee ku xusan Taxanaha Shanaad.  Xeerarka Somaliland waxa ay illaaliyaan caruurta lagu soo eedeeyey danbiyada. Dhammaanteen masuuliyad ayaa ina saaran si aynu u xaqiijiyo in xeerarkaasi ay yihiin kuwo shaqaynaya si loo ilaaliyo dhammaan carruurta oo dhan, oo ay ku jirto in loola dhaqmo in ay yihiin beri illaa danbiga lagu caddaynayo.

# TAXANIHII LABAAD:

## XABSIYEYNTA CARRUURTA KA HOR INTA AYNA MAXKAMADDU GO'AAN KA GAADHIN IN AY YIHIIN DAMBIILEYAAL

*Xeerku waxa uu u ogol yahay carruurta 15 illaa 17 jir ah isla markaa lagu hayo saldhigga booliska ama xabsiga in loo sii daayo waalidkood inta nidaamka caddaalad ciqaabeedku uu baadhayo kiiskooda. Balse, carruurtu ma helaan dhawristan sharci waana la  xabsiyeeyaa iyaga oo kiisaskoodu maxkamada ka socdaan.*



*Yaxye oo guriga jooga kadib markii danbi lagu waayey.*

Bishii February, 2019 Boolisku waxa ay xidheen Yaxye Mustafa Jaamac[1] oo da'diisu ahayd 15 jir. Saraakiisha ayaa yimid gurigii uu degganaa kana dalbaday isaga in uu yimaado Saldhigga Booliska ee Qudhac Dheer, Hargeysa. Waxa ay ku yidhaahdeen in ay u sheegi doonaan sababta marka uu goobtaa yimaado. Aabbihii ayaa sii raacay. Saldhigga gudihiisa, boolisku waxa ay sheegeen in Jaarka Yaxye ay ku eedeeyeen in uu dhaawac u geystay una xidhayaan isku-day dil. Boolisku waxa ay geliyeen qol saldhigga ah.

[1] *Horizon* ayaa  kaalmo sharci u fidisay Yaxye. Aabbihii ayaa saxeexay in la baahin karo sawirkiisa iyo in qisadiisa la isticmaali karo isaga oo rajo ka qaba in hannaanka caddaaladdu kor u qaado habka uu ula dhaqmo carruurta.

Kiiska Yaxye maxkamadda ayaa loo gudbiyey waxana uu ku sii xidhnaa saldhigii muddo 9 billood iyo 15 maalmood ah markii danbi lagu waayey. Wax caddeyn ah looma haynin in uu Yaxye isku dayey dilka jaarkiisa sidaa awgeed maxkamaddu waxa ay amartay in laga sii daayo saldhigga booliska. Caddaalad darradu may hayn in maxkamaddu ka qaado kiiskiisa. Yaxye 15 jir ayuu ahaa markii lagu eedeeyey in uu dhaawacay jaarkiisa, wuu joogay da'dii qaangaadhka ee Xeerka Somaliland dhigayey in la xidho, lagu soo eedeeyo danbi dacwadna lagu soo oogo.[2] Caddaalad darradu waxa ay ahayd in la xidhay ka hor xataa intii ayna maxkamadi go'aan ka gaadhin in uu danbiile yahay ama uuna ahayn.

Yaxye waxa lagu ciqaab mariyey danbi uuna abid gelin. Sharcigu waxa uu dhigayaa in qofkastaa beri yahay illaa lagu caddaynayo danbiga.[3] Waxa kale oo uu xusayaa in ka xayuubinta xorriyadda carruurtu noqoto tallaabada ugu danbaysa.[4] Xadhigu waa ciqaab waxana loogu talo galay in la dhaqan-geliyo kadib marka maxkamadi ay qofka ku hesho faldanbiyeedka. Arrintani waxa ay si gaar ah u taabanaysaa  carruurta. Waxa ay ka dhigan tahay markii boolisku baadhayeen kiiska Yaxye, markii xeer-ilaalintu ku soo oogaysay dacwadda, iyo markii maxkamaddu dhegaysanaysay kiiskiisa in ay ixtiraamaan xuquuqdiisa una ogolaadaan in uu waalidkii u raaco gurigooda. Halkii taa laga samayn lahaa, waxa lagu hayey saldhigga booliska..

Arrintani in ay dhacdo may ahayn. Waxa jira hannaan sharci, oo loo yaqaan dammaanad, kaas oo u ogolaanaya dadka lagu soo eedeeyey dembiyada in laga sii daayo saldhigyada booliska iyo xabsiyada loona diro guryahooda illaa inta dacwaddoodu ka soo dhammaanayso maxkamadda. Xuquuqda sharci ee damaanadu laba ujeedo ayey leeyahay: (1) in la hubiyo in aan xukuumaddu qofka iska ciqaabin oo xabsi ku ridin ka hor inta aan danbiga lagu helin iyo (2) in la hubiyo in qofka eedaysanaha ahi uu hor yimaado maxkamadda si dacwad loogu oogo. Waxa loogu tallo galay in dadka laga illaaliyo in lagu hayo saldhigyada booliska iyo xabsiyada illaa uu garsoore ku helayo danbiga. Ujeedadu waa in aan si fudud dadka loo xidhin illaa la hubiyo in dacwad lagu soo oogi karo, gaar ahaan marka booliska iyo xeer-ilaalintu ay baadhayaan faldanbiyeed lagu eedeeyey qofka.

Carruurtu waxa ay leeyihiin xuquuq intaa ka ballaadhan oo ah in garsooruhu u tixgeliyo in lagu sii daayo damaanad. Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta ee 2007 waxa uu u ogolaanayaa garsooreyaasha in ay qiimeeyaan in ay sii daayaan ama hayaan carruurta —17 jir iyo ka yar—iyaga oo ku wareejinayaa waalidkood ama masuuliyintooda iyada oo aan loo eegeyn waxa lagu soo eedeeyey waxa uu yahay.[5] Waxa si cad uga soo horjeeda dadka waaweyn—18 iyo ka weyn—kuwaas oo marka lagu soo eedeeyo danbiyada culus sida kufsiga iyo dilka aan xaq u lahayn dhawristan sharci.[6] Balse carruurta ma jiraan

[2] Qodobka 10aad, Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta (2007) (loo soo gaabiyey: "XNGC").

[3] Qodobka 26(3), Dastuurka Somaliland (2001) iyo  Qodobka 9(1)(c), XNGC.

[4] Qodobka 8, XNGC.

[5] Qodobka 55, XNGC. Qodobka 55(1) waxa uu dhigayaa " Iyadoon la tixgelinayn qodobada Xeerarka kale, ilmaha waxa lagu siidayn karaa damaanad loogu dhiibo Waalidkii ama qofka ka Masuulka ka ah." Kalmadda "iyadoon la tixgelinayn qodobada xeerarka kale" waxa ay ka dhigan tahay wax kasta oo xaddidi kara xuquuqda damaanada ee ku dhigan Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Ciqaabta Guud, Sharciga kala danbaynta dadweynaha ama xeer kasta in aan lagu dabbiqi karin carruurta. Waxa ka sii muhiimsan, waxa uu u ogolaanayaa carruurta in lagu sii daayo damaanad iyada oo aan loo eegeyn danbiga lagu soo eedeeyey nooca uu yahay. Kiis kasta waa in garsoore go'aan ka gaadhaa in ilmaha lagu sii daayo damaanad, isla markaa dejiyaa shuruudaha lagu ansixinayo damaanada.

[6] Qodobka 35, Xeerka Habka Ciqaabta ee Somaliland (1963) (loo soo gaabiyey: "XHC").

danbiyo ayna damaanaddu suurtagal ahayn.[7] Kiis kasta, garsoore waa in uu qiimeeyaa in ay tahay in la xidho ama la sii daayo ilmaha inta dacwaddiisu ka socoto maxkamadda. Kuma khasbana in ay sii daayaan, balse ugu yaraan waa in ay tixgeliyaan. Waa mid ka mid ah sida uu sharcigu u aqoonsaday in carruurtu ayna ahayn dad waaweyn. In carruurtu aad u nugul yihiin maadaama ay da'doodu yar tahay iyo in haddii lagu hayo saldhigga booliska ama xabsigu ay mustaqbalkooda halis gelinayso.

Maadaama carruurta damaanad lagu sii deyn karo iyada oo aan la eegayn danbiga lagu soo eedeeyey, kiis kasta oo ilma yar ku lug leh garsooruhu waa in uu ka jawaabaa laba su'aalood: (1) Ma tahay in ilmaha loo sii daayo waalidkii ama masuulkiisa inta dacwaddiisu ka socoto maxkamadda? Iyo (2) haddii jawaabtu haa tahay, waa maxay shuruudaha lagu xidhayo si loo hubiyo in ilmuhu dib ugu soo noqonayo maxkamadda?

Go'aanka uu garsoore ugu ogolaan karo in uu ilmo sii daayo inta dacwaddiisu socoto waxa ay ku xidhan tahay sababo kala duwan. Haddii garsooruhu aamminsan yahay in uu ilmuhu baxsanayo ama uu danbi kala sii galayo, dabcan uma ogolaanayo damaanada. Balse haddii uu go'aansado garsooruhu in ayna suurtagal ahayn in ilmuhu baxsado ama danbi kale galayo, iyo in uu u baahan yahay in uu tago dugsigiisa iyo qoyskiisa uu u raaco guriga, wuu sii deyn karaa haddii shuruudo gaar ah uu buuxiyo.

Shuruudaha uu garsooruhu dejinayo marka uu u dirayo ilmo guriga isaga oo damaanad ku sii deynaya waxa loogu tallo galay si loo xaqiijiyo in ilmuhu dib u soo noqdo waqtiga dhegaysiga dacwadda. Waxa ku jiri karta in maxkamadda lagu soo noqdo waqti cayiman, in maxkamaddu ka hayso alaab qiimo leh oo loo celin doono kaliya marka dhegaysiga maxkamaddu dhammado ama in ay ballan qaadaan in ay ka fogaanayaan dhib oo dhan.[8] Inta badan maxkamaddu waxa ay u baahataa qof, sida caaqilka beesha ama waalidka in ay ballan qaadaan in ay ilmaha dib u soo celinayaa waqtiga dhegaysiga dacwadda. Haddii aan shuruudahaa la fulinayn, ilmaha dib ayaa loo xidhi karaa. Qaabkan, damaanadu waxa uu u ogolaanayaa in ay ixtiraamto xuquuqda damaanadda iyo in qofka loola dhaqmu in uu yahay bilaa danbi iyo in xadhiga carruurtu noqoto tallaabada ugu danbaysa ee la qaadayo marka xal kale la waayo. Isla markaa, in la sameeyo tallaabo kasta oo lagu xaqiijinayo in ay dib ugu soo noqdaan maxkamadda.

Garsooraha ayay ahayd in uu Yaxye u tixgeliyo in loo sii daayo aabbihii iyada oo la eegayo da'diisa. Haddii uu 18 jir ahaan lahaa, xaq umuu lahaadeen damaanada maadaama lagu soo eedeeyey isku day dil. Balse maadaama Yaxye ahaa 15 jir oo kaliya, waxay ahayd in loo sii daayo aabbihiis. Arrintan waa la il-duufay. Haddii la sii deyn lahaa inta kiiskiisu socdo, wuu ku soo laaban lahaa maxkamadda. Hadduuna ku soo

[7] Sharci ahaan ilmuhu yuu hoos imanaya? XNGC si cad uma qeexayo wuxuna isticmaalaya erayga 'ilmo' qaabab kala duwan. Qodobka koowaad waxa uu dhigayaa "ilmo"waa ilmo kasta oo ka yar 15 jir. Sidaa kasoo horjeedkiisa, Qodobka 10 iyo 64 waxa uu ku qeexayaa "ilmo" qof kasta oo ka yar 17 sanno. Si loo mideeyo erayadaa aan is waafaqsanayn waxa la tixraaci karaa tafsiirka ku cad Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta kaas oo dhigaya in ilmo loo aqoonsado ilma kasta oo ka yar 18 jir. Qodobka 2 ee XNGC, waxa uu dhigayaa in xeerka uu gundhig u yahay Heshiisyada Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta, waxa ay xoojinaysaa in "ilmaha" sida uu dhigayo XNGC waa qof kasta oo ah 17 iyo ka yar. Hab kale oo lagu midayn karo eray bixinta kala duwan ee ilmaha waa in la isbarbar dhigo Qodobada 47 iyo 55 ee xeerka. Qodobka 47 ee XNGC waxa uu dhigayaa Ilmaha ka yar shan iyo toban sanno looma xidhi karo dembi, hadii aanay nabad gelyadiisa ahayn, Ilmaha la xidho nabad-gelyadiisa darteed waa in si dhakhso ah loo wargeliyaa waalidkii ama qofka masuulka ka ah ama qareenkiisa. Ilmaha ka yar shan iyo toban sano ee fal dambi loo qabanayo waxaa lagu haynayaa damaanad. Halka ka soo horjeedkiisa Qodobka 55 Iyadoon la tixgelinayn qodobada Xeerarka kale, ilmaha waxa lagu siidayn karaa damaanad loogu dhiibo Waalidkii ama qofka ka Masuulka ka ah.

[8] Qodobka 55(2) ee XNGC waxa uu dhigayaa in shuruudaha damaanada carruurtu uu la mid noqdo kuwa ku xusan Xeerka Habka Ciqaabta. Shardigan waa in aan lagu qaldin xaqa tixgelinta damaanada. Sida uu dhigaya Qodobka 59 ee Xeerka Habka Ciqaabtu waxa uu burinayaa marka qof weyn uu galo danbi culus.

laabteen, dib ayaa Yaxye loo xidhi lahaa. Caddaaladduna sidaas ayay ku hana qaadi lahayd. Waxana loola dhaqmi lahaa in uu bilaa danbi yahay xadhigiisana xalka ugu danbeeya ayuu noqon lahaa halkii ay ka noqotay tallaabadii koowaad.

Waqtigii uu Yaxye ku qaatay Saldhigga Booliska ee Qudhac Dheer isaga iyo qoyskiisaba saameyn ayay ku yeelatay. Markii ay socotay dacwaddiisu, aabbihii Mustafe saacado ayaa kaga lumay maxkamadda intii uu sugayey garsoore dhegaysta dacwadda ilmihiisa. Maadaama kiisku dib u dhacay, waqti ayuu u waayey uu Mustafe ku shaqaysto wuxuuna ku noolaa deyn uu soo amaahday.



*Mustafe, Yaxye Aabbihiis.*



*Injineer Yaxye ayaa ku qoran albaabka.*

> Aniga oo kaliya ayaa ka shaqeeya qoyska, balse waxa aan ku khasbanaaday in aan shaqadayda ka tago. Carruurtu dhammaan waa ciyaal shaqana ma hayaan. Marka aanan shaqaynayn, qoyskaygu ma haysto dakhli kale oo soo gala. Saameyn weyn oo dhaqaale ayay nagu yeelatay... Balse maxkamadda ayaan tegi jiray maallin kasta. Jugtii ugu weynayd ee isoo gaadhay waxay ahayd markii ilmahayga maxkamadda la keenay oo xukun lagu riday aniga oo aan ogeyn.[9]

[9] Hargeysa ayaa lagu waraystay 28 October 2019.

Dhibaatooyinku way sii jiitameen ka dib markii la sii daayey Yaxye. Ka hor intii aan la xidhin, yoolkiisu waxa uu ahaa in uu noqdo Injineer. Inyar kadib markii danbi lagu waayey, aabbihii waxa uu sheegay in uu ka maagay in uu ku laabto dugsigii.

> Yaxye aad ayuu uga murugooday in uu ku laabto dugsiga. Wuxu ii sheegay in uu ka doorbidayo in uu galo farsamada gacanta. Balse weli waxba islamaanu meel dhigin. Waxa uu inankaygu ka warwarsan yahay dacaayadda uga iman doonta ciyaalka dugsigu in ay ku dhaleeceeyaan in la xidhay.

Ugu danbayntii Yaxye waxa uu dib ugu laabtay dugsiga, balse hal sanno ayuu dib uga dhacay carruurta la faca ah.

## Caruurtu waxay ku qaadataa usbuucyo iyo billo xabsiyeynta ka horaysa inta aan maxkamadi go'aamin inay galeen ama aanay galin dambi

Yaxye kali kuma aha. Waxa jira ubad kale oo isaga oo kale ah oo ku xidhan saldhigyada booliska iyo xabsiyada Somaliland oo dhan kuna qaata usbuucyo ama bilo inta kiiskoodu ka socdo maxkamadda. Natiijada kiisaskaasi way kala duwanaayeen. Qaar danbigii ayaa lagu helay, qaar xeer-dhaqameed ayaa lagu xalliyey, kuwo kalena sida Yaxye iyo qaar la mid ahna danbi ayaa lagu waayey. Balse waxa ay ka siman yihiin in dhammaan carruurtaa la hayey mudadii go'aanka laga gaadhayey in ay danbiga sameeyeen iyo in kale, waxayna ahayd in loola dhaqmo in ay yihiin bilaa danbi.

Dhammaan carruurta hoos ku xusan *Horizon* ayaa u fidisay kaalmo sharci. Waxa ay matalayaan carruurta da'doodu u dhaxayso 15 illaa 17 jir ee ku eedaysan faldanbiyeedka kuna jira goobaha ay *Horizon* ka shaqayso ee Somaliland. Si loo illaaliyo in aan la aqoonsan, magacooda koowaad oo kaliya ayaa la isticmaalay.

Dhammaan wiilashan hoos ku xusan waxa ay muddo ku qaateen saldhigyada caasimadda ee Hargeysa ka hor inta aan go'aan laga gaadhin danbigooda.

- Abdifatah (17) iyo Assad (16) waxa la soo xidhay October 2019 waxana ay ku jireen Saldhigga Booliska ee Macalin Harun muddo afar billood ah. Waxa lagu soo eedeeyey in ay qof dhaawaceen. Waxa lagu waayey danbiga February 2020.

- Suhayb (17) waxa la soo xidhay October 2019 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Macalin Harun. Waxa lagu soo eedeeyey in uu wax xaday. Afar billood ayuu xidhnaa ka hor intii danbiga lagu waayey February 2020.

- Sakariye (15), Ridwan (15), Mustafe (15), Subayr (16), Mustafe (15) iyo Amin (15) waxa la soo xidhay February 2019 waxayna ku xidhnaayeen Saldhigga Booliska ee Kood Buur. Waxa lagu soo eedeeyey in ay qof dhaawaceen. Billawga dacwaddooda dib ayaa loo dhigay sababtoo ah warbixintii caafimaadka ee dhibanaha ayaa si joogto ah dib ugu dhacaysay. Waxa la sii daayey May 2019, kadib markii ay afar billood ku qaateen saldhigga booliska, iyada oo caddeyn lagu waayey.

- Hamse (17) waxa lagu hayey Saldhigga Booliska ee Kood Buur muddo 3 billood ah isaga oo lagu eedeeyey in uu qof dhaawacay illaa lagu sii daayey heshiis xeer-dhaqameed ah March 2020.

- Badri (16) waa la xidhay oo lagu hayey Saldhigga Booliska ee Koodbuur dagaal uu galay awgii. 1 usbuuc ayuu xidhnaa ka hor intii ayna qoyskiisu gelin heshiis xeer-dhaqameed ah March 2020.

- Khalid (17), Ahmed (15) iyo Saki (17) waxa lagu xidhay Saldhigga Booliska ee Koodbuur July 2019. Waxa lagu eedeeyey in ay qof dhaawaceen. Waxa la hayey ku dhawaad 3 billood ah waxana lagu sii daayey heshiis xeer-dhaqameed ah October 2019.

- Suhayb (17), Ahmed (16), Abdijibar (16), Mohamed (15), iyo Muhyadin (15) waxa la soo xidhay February 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Koodbuur dagaal ay galeen awgii. Muddo 12 maalmood ah ayaa la hayey waana la sii daayey kadib markii qoysaskoodu ay galeen heshiis xeer-dhaqameed ah March 2020.

- Ridwan (17) and Shacbaan (17) waxa la soo xidhay January 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Sheekh Nuur. Waxa lagu soo eedeeyey in ay dhagaxaan isku tuurayeen rabshadana samaynayeen. Kadib markii ay 6 billood xidhnaayeen iyaga oo aan danbi lagu helin, waxa lagu xukumay 6 billood June 2020. Inamadii markiiba waa la sii daayey sababtoo ah hore ayay u soo dhammaysteen 6 dii billood ee lagu xukumay.

- Saddam (17) waxa lagu xidhay Saldhigga Booliska ee Daloodho September 2019. Waxa lagu soo oogay xadis kiiskiisuna maxkamadda ayuu galay. Waxa lagu hayey Saldhigga Booliska ku dhawaad 4 billood ka hor intii ayna maxkamaddu ku helin danbiga kuna xukuntay 1 sanno oo xadhig ah December 2019.

- Abdikadir (16) waa la soo qabtay laguna hayey Saldhigga Booliska ee Daloodho iyada oo lagu xidhiidhinayo telefoon la soo xaday February 2020. Waxa lagu helay danbiga April 2020 in uu soo iibsaday telefoon la soo xaday, maaha mid isagu uu xaday, ganaaxna waa la saaray 2 billood ayuu ku jiray saldhigga.

- Khadar (17), Yahye (17), Mustafe (15) iyo Abdikadir (16) waxa lagu xidhay Saldhigga Booliska ee Qudhac Dheer December 2019. Waxa lagu soo eedeeyey in ay aroos ku dhex dagaalameen qofna dhaawaceen. Wiilashaa 3 billood ayaa la hayey ka hor intii aan lagu helin danbiga March 2020 laguna xukumay 6 billood.

- Amin (16), Sakariye (15), Salman (15) iyo Hamse (15) waxa la xidhay January 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee New Hargeisa dagaal ay galeen. 2 billood ayay ku jireen waana la sii daayey kadib markii lagu waayey danbi March 2020.

Arrintan oo kale waxa ay ka dhacdaa goobaha magaalooyinka iyo tuulooyinka yaryar ee Somaliland.

- Suhayb (17), Fatxi (16), Abdinajib (15), Mohamed (15), Hamse (15) iyo Abdikadir (15) waxa October 2018 soo xidhay Booliska Gabiley. Waxa lagu soo eedeeyey in ay wax xadeen. Danbi ayaa lagu helay waxana la hayey inta u dhaxaysa 1 bil illaa 3 billood illaa ay qoyskoodu ka bixinayeen ganaaxii maxkamaddu amartay.

- Khalid (17) waxa soo xidhay Booliska Gabiley December 2018. Waxa lagu soo eedeeyey in uu qof dhaawac gaadhsiiyey. Waxa lagu hayey saldhigga boolsika 15 maalmood ka hor intii aan lagu sii deyn dammaanad.

- Abdiqani (16), Awil (16), Sakariye (16), iyo Abdishakur (15) waxa lagu soo eedeeyey in ay qof dhaawaceen waxana lagu hayey Saldhigga Booliska Gabiley. 1 bil kadib Maxkamadda Gabiley waxa ay amartay in la sii daayo November 2019.

- Mohamed (15), Ali (15), Sakariye (16), Mawlid (16) iyo Ahmed (17) waxa lagu xidhay Saldhigga Booliska ee Gabiley February 2019. Waxa lagu soo eedeeyey in ay wax soo xadeen. 2 maalmood ayaa la hayey ka hor intii aan lagu sii deyn heshiis xeer dhaqameed ah.

- Mohamed (17) waxa lagu hayey Xabsiga Balligubadle 2 billood ka hor inta kiiska loo haystay oo ahaa dhaawac fudud aan lagu xallin nidaamka xeer-dhaqameedka November 2019.

- Nasir (17), Hamse (16), Guleid (17), Ibrahim (16) iyo Ridwan (17) dhammaantood waxa lagu hayey Saldhigga Booliska ee Wajaale. Waxa lagu soo eedeeyey in ay dhaawac gaadhsiiyeen qof. Waxa lagu hayey saldhigga booliska 4 maalmood illaa qoysaskoodu ay ka gaadhayeen heshiis xeer-dhaqameed ah September 2019.

- Abdillahi (17) waxa loo soo qabtay oo dacwad loogu soo oogay dhaawac uu gaadhsiiyey qof. Intii maxkamaddu kiiskiisa dhagaysanaysay waxa lagu hayey saldhigga booliska ee Wajaale. April 2019, garsoore ayaa danbiga ku waayey kadib markii uu xidhnaa muddo bil ah.

- Jaleh (15) iyo Anas (15) waxa laga soo qabtay oo lagu hayey Saldhigga Booliska ee Wajaale iyada oo lagu soo eedeeyey in ay dukaan ka soo xadeen Surwaal Jiinis ah. Waxa ay ka soo jeedeen magaalada xuduuda ee Wajaale dhanka Itoobiya. Mid kamid ah hooyooyinkood ayaa bixisay lacagtii surwaalka. Waxa la sii daayey July 2019 kadib markii 2 billood ay ku qaateen saldhigga booliska.

- Abdisalam (17), Jimaale (16) iyo Amin (16) waxa la soo qabtay January 2020 waxana lagu hayey Saldhigga Booliska ee Wajaale. Waxa loo hayey iyaga oo lagu soo eedeeyey dagaal iyo in ay dhagaxaan isku shiidayeen. 5 billood ayay xabsiga ku qaateen intii ay qoysaskoodu ku guda jireen heshiiska xeer-dhaqameedka ka hor intii aan la sii deyn May 2020.

- Mustafe (16), Abdikarim (17), iyo Sharmarke (15) waxa la soo xidhay iyaga oo lagu eedeeyey dagaal iyo in ay dhaawac qof gaadhsiiyeen. Waxa lagu hayey Saldhigga Booliska ee Boorama muddo bil iyo badh ah illaa ay qoysaskoodu ka gaadhayeen heshiis xeer-dhaqameed ah August 2019.

- Sahal (17) waxa lagu hayey Xabsiga Boorama muddo bil ah, isaga oo lagu eedeeyey in uu wax xaday September 2019. Heshiis xeer-dhaqameed ah ayaa lagu sii daayey 2019.

- Abdirashid (17) iyo Omer (17) waxa lagu soo xidhay in uu burbur hanti ay geysteen waxana lagu hayey Xabsiga Boorama. Waxa ay xidhnaayeen muddo hal bil ah waxana la sii daayey February 2020 kadib markii waalidkood bixiyeen hantidi ay waxyeelada gaadhsiiyeen.

- Subayr (16) waxa lagu soo eedeeyey in uu taayiro soo xaday waxana la soo xidhay January 2020. Waxa lagu hayey Xabsiga Boorama. Waalidkii ayaa bixiyey taayiradii waxana la sii daayey February 2020 kadib markii bil iyo 5 maalmood uu xabsiga ku jiray.

- Abdirisak (15), Muse (17) iyo Amin (15) waxa lagu xidhay oo lagu hayey Xabsiga Boorama kadib markii lagu eedeeyey in ay alaab soo dhaceen in January 2020. 45 maalmood ayay xidhnaayeen ka hor intii aan danbiga lagu waayin February 2020.

- Suhayb (16) waa la soo xidhay laguna hayey Xabsiga Burco kadib markii qof ku soo eedeeyey in uu xaday telefoon. Muddo bil ah ayaa lagu hayey halkaas illaa lagu sii daayey heshiis xeer-dhaqameed ah November 2019.

- Mohamed (16), Abokor (15), Mohamed (16) iyo Abdifatah (15) waxa la soo xidhay January 2020 iyaga oo lagu eedaynayo in ay soo xadeen telefoon. Waxa lagu hayey Xabsiga Burco. Maxkamadda ayaa danbigii ku weyday March 2020.

- Subayr (16) waxa loo soo xidhay in uu iibsaday telefoon la soo xaday. Xabsiga Burco ayaa lagu hayey intii maxkamaddu ka dhegaysanaysay kiiskiisa. Danbigii ayaa lagu helay waxana lagu xukumay in uu bixiyo ganaaxa. Waa la sii daayey kadib markii qoyskiisu bixiyeen ganaaxii March 2020 kadib markii uu 3 billood ku jiray xabsiga.

- Abdirisak (17) iyo Ibrahim (17) waxa lagu xidhay Xabsiga Caynabo. Waxa lagu soo eedeeyey in ay telefoon xadeen. Iyaga oo aan danbi lagu helin ayaa la hayey muddo 2 billood ah illaa waalidkood bixiyeen telefoonkii April 2020.

Habluhu sidoo kale waqti ayay ku qaateen saldhigyada booliska iyo xabsiyada ka hor inta aan maxkmadi ku helin danbiga ama ku waayin.

- Ugbad (15) iyo Maya[10] (17) waxa lagu xidhay Hargeysa oo lagu hayey Saldhigga Booliska ee Daloodho June 2019. Waxa lagu eedeeyey in ay gacan-siin kufsi. Waxa la hayey muddo 5 billood ah illaa qoyskeedu bixiyeen ganaaxii October 2019.

[10] Kiiska oo aad u xasaasi ah awgii magacyo kale ayaa la isticmaalay si aan loo aqoonsan carruurta.

- Muna (15) waxa lagu xidhay Saldhigga Booliska ee Koodbuur, Hargeysa lacag ay soo xadday. In ka badan bil markii ay ku jirtay saldhigga, maxkamad ayaa amartay in la sii daayo kadib markii caddayn loo waayey.

Haddii garsooreyaashu si joogto ah u bixin lahaayeen dammaanadda, waa laga badbaadi lahaa dhibtaa soo gaadhay carruurtaa iyo qoysaskooda ee usbuucyada iyo bilaha ku qaatay saldhigyada booliska iyo xabsiyada.

## Maxaa loo baahan yahay in la baddelo?

In la helo damaanad lagu sii daayo carruurta oo dhan, iyada oo aan loo eegeyn nooca danbiga ay galeen, waa in ay maxkamaddu tixgelin siisaa. Hadda, carruurta la sii daayo iyaga oo dacwaddoodu socoto waa xaalado gaar ah, balse sharcigu waxa uu dhigayaa in carruurta oo dhan loo isticmaalo.[11] Hadii ay leeyihiin waalid ama masuul oo qaadi kara masuuliyadda dib loogu soo celinayo maxkamadda, waa in guriga loo diraa. Haddii ayna haysan waalid ama masuul xaqiijin kara in uu dib ugu soo celiyo maxkamadda, ma aha in la sii daayo. Balse fursadda in la sii deyn karo ka hor dhegaysiga dacwaddda waa in ugu yaraan la qiimeeyaa.

[11] Qodobka 55, XNGC.

# KA MID AHAANSHAHA XALKA

## Maxaad Qaban kartaa oo aad ku Caawin kartaa?

Dhammaanteen waxa aynu samayn karno oo aynu ku wanaajin karnaa damaanada in Somaliland oo dhan laga isticmaalo.

- Haddii aad tahay waalid ama qof masuul ka ah ilmo yar, waxa aad leedahay doorka ugu muhiimsan. Marka ilmahaaga la xidho, waa in sida ugu dhakhsaha badan aad u tagtaa maxkamadda garsoorahana aad ka codsataa in uu sii daayo ilmahaaga inta dacwaddooda lagu guda jiro.

  Isku diyaari in aad u macnaysid sababta aad rabtid in ilamahaaga loo sii daayo.

  > Haddii ay dugsi aadaan u sheeg garsooraha.
  >
  > Haddii aad u shaqo tagtid oo aad qoyska caawisid, u sheeg garsooraha
  >
  > Haddii ay tahay markii koowaad ee abid ilamahaaga la xidho ee ay booliska isku dhacaan, u sheeg garsooraha.
  >
  > Sidoo kale, u sheeg garsooraha in aad fahansan tahay in loo baahan yahay in aad dib ugu soo celisid maxkamadda iyo in waalid ahaan aad ballan qaadaysid arrintaa.
  >
  > Isku diyaari in aad ballan-qaadkaa oo qoraal ah aad u gudbisid garsooraha haddii lagaa codsado.

  U dood ilmahaaga in aad guriga u kaxaysatid waxa ay caawinaysaa fursadda ilmahaagu damaanad ku heli karo iyo in isticmaalka damaanadu caan ka noqdo Somaliland.

- Haddii aad caaqil tahay, door muhiim ah ayaad leedahay in uu damaanada carruurta lagu eedeeyey faldanbiyeedka ay noqoto mid la hirgeliyo. Carruurta, iyo dadka waaweynba, ee ku eedaysan faldanbiyeedka kuna xidhan saldhigyada boolisku inta badan garsooruhu waxa uu u baahdaan caaqil masuul ka noqda. In aad aqbashid masuuliyaddan waxa ay caawinaysaa ilmaha in loo diro gurigiisa oo aanu bilo ku qaadan saldhigga ama xabsiga ka hor inta aan la xukumin.

- Haddii aad tahay macallin ka hawlgala dugsi, la wadaag xogtan waalidka iyo ardayda. In aad xaqiijisid in xeerkan ay fahansan yihiin waalidku waxa ay ka badbaadinaysaa ubadka xabsiga waxayna fursad u siinaysaa in ay joogaan dugsiga.

- Haddii aad la shaqaysid NGO ka shaqeeya xuquuqda carruurta iyo dhawristooda, u sheeg qoysaska aad la shaqaysid waxa damaanadu ku saabsan tahay iyo sida ay u illaalin karto ubadka u dhexeeya 15 illaa 17 jir.

- Haddii aad tahay suxufi, ama aad saxaafadda ka hawlgashid, door muhiim ah ayad ka ciyaari kartaa sidii bulshada loogu wacyi gelin lahaa xeerkan. Soo baadh sida arrimahani uga dhacaan bulshada aad la nooshahay kana diyaari warbixino. Bulshadu waxa ay u baahan tahay in ay ogaato in aad bilaa danbi tahay illaa lagu caddaynayo danbiga sidoo kale hanaankan sharci ee damaanaduna waxay illaalinaysaa xuquuqdaas.

- Haddii aad tahay sarkaal booliis ah, xeer-ilaaliye ama garsoore, waxa aad udub-dhexaad u tahay hirgelinta xeerkan. Xaqiiji in aad u sheegtid ilmaha iyo waalidkaba in ay leeyihiin xaqa damaanada in loo tixgeliyo iyo waxa ay ka dhigantahay. Waqtiga aad gelinaysid in aad u sharraxdid dhawristan sharci waxa ay caawinaysaa saldhigyada booliska iyo xabsiyadu in ayna buux-dhaafin, waxayna kaa caawinaysaa in aad qof walba ula dhaqantid in uu beri yahay illaa danbigu ku caddaanayo.

- Qof kasta waxa uu ka qayb qaadan karaa in la kordhiyo isticmaalka damaanada. Dadka intooda badan ma garanayan waxa uu ka dhigan yahay iyo in uu muhiim u yahay xuquuqda qofka ee ah in loola dhaqmo beri illaa danbiga lagu helayo. La wadaag xogtan qoyskaaga, asxaabtaada, jaarkaaga iyo akhyaarta aad wada shaqaysaan. U sheeg in ay caawin karaan qoyskooda oo ay codsan karaan damaanad haddii mar uun la xidho. Arrintani waxa ay carruurta ka badbaadin doontaa dhibta iyo ciqaabta ay mari lahaayeen oo lagu karbaasho danbi ayna gelin sidoo kale waxa ay qoyska ka badbaadinaysaa waqtiga iyo kharashka kaga baxa marka ilmuhu xabsiga ku jiro.

*Waxa aanu soo dhawaynaynaa talobixinaha ka imanaya akhristayaasha ee khusaysa sida arrinta lagaga hadlayo warbixintan loogu faafin lahaa si baahsan dhagaystayaal kala duduwan tiiyoo ujeedadu tahay ilaalinta dhamaan caruurta ku nool Somaliland.*

***Hay'adda Horizon waa Urur Maxalli ah oo ka hawlgala Somaliland kana shaqeeya sidii loo horumarin lahaa sarreynta sharciga iyo xuquuqal insaanka. Warbixinaha iyo daraasadaha aanu soo saarnaa waxa ay daah-furaan arrimaha taaggan ee lagu ogaaday shaqada aanu qabano. Waxa ay bixiyaan xog iyo gorfeyn loogu tallo galay in ay cariso doodda ka dhaxaysa daneeyeyaasha, dadweynaha iyo deeq-bixiyaasha iyo in ay kor u qaado siyaasadaha xukuumadda iyada oo lagu salaynayo qadarinta xuquuqal insaanka, sarraynta sharciga iyo dhiirigelinta isku filaanshaha.***

***Si aad wax badan uga ogaatid hawsha aanu qabano, fadlan booqo degalka internet-ka aanu ku leenahay ee www.thehorizoninstitute.org nagala socda Twitter @Horizon_SL iyo Facebook @HorizonInstituteSomaliland.***

***Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad u baahan tahay, waxa aad nagala soo xidhiidhi kataa email-ka info@thehorizoninstitute.org iyo telefoonada +252 523603/ +252 711208.***

## NALA SOO XIDIIDH

6th Floor, Omar Hashi Building
Hargeisa, Somaliland
+252 523603/ 0633751063

1st Floor, Sagal Jet Building
Burao, Somaliland
+252 711208

info@thehorizoninstitute.org

## Soo booqo baraha internet-ka

www.thehorizoninstitute.org

Twitter: @Horizon_SL

Facebook: @HorizonInstituteSomaliland

**All photos by Petterik Wiggers**

HORIZON INSTITUTE